



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

LAALIDDA QODOBBADA 67^{aad} 135^{aad} EE DASTUURKA
FEDERAALKA SOOMAALIYA

Muqdisho 02 Nofeembar 2012

A handwritten signature in black ink, consisting of stylized, overlapping loops and lines.

GOLAHA SHACABKA:

Markuu arkay: Qodobka 67^{aad} ee Dastuurka kuna saabsan kala diridda Golaha Shacabka oo ku sababeysan haddii uu awooddi waayo ansixinta Golaha Wasiirada iyo Barnaamijka Xukuumadda,

Fiiro gaar ah u yeeshay: Ahmiyadda jiritaanka Golaha oo madashiisu dhamaystirto u leeyahay dib-u-dhiska hay'adaha Qaranka;

Markuu arkay: in muddeynta gudahood la doonayo in lagu dhiso Hay'adaha Qaran ee Madaxabannaan kuna xusan Qodobka 135^{aad} ee Dastuurka ay suurto gal u ahayn Xukuumadda Federaalku in ay muddooyinkaas gudahood ku soo diyaariso soo jeedimaha hindiseyaalka sharci looga baahan yahay in ay Golaha shacabka horkeento iyo dhamaystiridda dhismaha hay'adaha madaxabannaan;

Markuu arkay: Aftiqoraalka Ergada Shacbiga Soomaaliya oo si ku-meel-gaar ah u ansixisay Dastuurka Federaalka dib-u-eegista iyo toosinta Dastuurkana u igmatay Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Soomaaliya;

Markuu qaddariyey: In ay lagama maarmaan tahay in qodobbada Dastuurka qaarkood la laalo qaarna wax-ka-beddelid ama toosin lagu sameeyo si loo sugo dhisidda hay'adaha Qaranka lagama marka u ah iyo si loo xaqiijiyo xasilloni siyaasadeed;

Markuu Arkay Soo-jeedinta iyo talooyinka ku taariikhsan 03.11.2012 ee Guddi-hoosaadka xildhibaanada Goluhu u xilsaaray daraasadda qodobbada Dastuurka loo baahan yahay in la laalo ama wax-ka-beddelid ama wa-ku-kordhin ama toosin lagu sameeyo;

Golaha Shacabka: Kalfadhigiisa 1^{aad} ee 3^{da} Nofeembar 2012, kuna kulansan Xaruntiisa Muqdisho aqlabiyad 204 cod ku oggolaaday kuna ansixiyey qodobbada soo socda:



Qodobka 1^{aad}

Laalid Qodobka 67^{aad} ee Dastuurka

1. Ayadoo la qaddarinaayo ahmiyadda jiritaanka Laanta Sharcidejinta Dawladda iyo xaaladda Dalka ku sugan yahay oo aan weli xasilin waxaa la laalay Qodobka 67^{aad} ee Dastuurka Federaalka oo u qoranaa sidan hoose:

“Lama kala diri karo Golaha Shacabka ka hor dhammaadka madashiisa afarta sano ah marka laga reebo haddii uu uu Goluhu awooddi waayo in uu ansixiyo Golaha Wasiirada iyo barnaamijka Dawladda sida ku xusan qodobka 100^{aad} (c) ee Dastuurkan.”

2. Saa daraadeed Goluhu wuxuu go'aamiyey oo ansixiyeyna in aan Goluhu la kala diri karin taniyo madashiisa dastuuriga ah ee afarta sano uu dhamaysto.

Qodobka 2^{aad}


Laalidda muddeynta Ku xusan Qodobka 135

Goluhu markuu qaddariyey in ay suurtoagal u ahayn in hay'adaha madaxabannaan lagu dhiso muddooyinka ku xusan Qod. 135-aad ee Dastuurka, wuxuu aqlabiyad 204 cod ku ansixiyey in aasaasidda ha'adaha madaxabannaan ku xusan qodobka 135-aad dib loo muddeeyo oo Xukuumadda fursad loo siiyo ugu dambayn 28-ka Febraayo 2013 Golaha Shacabka ku horkeento soojeedin waqtiyada ay hay'ad walba dhismaheeda ku soo dhamaystiri karto.

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangalka Qaraarka

Qaraarkan wuxuu dhaqangalaya markuu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Soomaaliya.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

